

# Xuquuqahaaga Shaqada

**Waxaad xaq u leedahay in si sax ah lagu siiyo mushaarkaaga.**

Sharciyada shaqadu waxay dejiyaan heerarka mushaarka ugu yar, mushaharka saacadaha dheeraadka ah la qaato, kaydinta diiwaanka, fasaxa qoyska iyo caafimaadka, iyo shaqada dhalinyarada.



**Mushaarka DOL iyo Qaybta Saacadaha (DOL's Wage and Hour Division)** waxay ka caawin kartaa shaqaalaha in la siiyo mushaarka saacadaha ay shaqeeyaan iyo inay helaan fasaxa caafimaadka iyo qoyska ee aan lacagta lagu siineyn.  
**(866) 487-9243**

**Waxaad xaq u leedahay inaad hesho goob shaqo oo ammaan ah oo caafimaad qabta.** Shirkadaha ayaa mas'uul ka ah bixinta goob shaqo oo ammaan ah oo caafimaad leh, oo laga helaayo qalab kasta oo badbaado oo lagama maarmaan ah.



**Maamuulka Caafimaadka iyo Badqabka Shaqada DOL** waxay hubiyaan in shaqaaluhu helaan ayna ku shaqeeyaan xaalado shaqo oo badqab iyo caafimaad leh.  
**(800) 321-OSHA (6742)**



**Guddiga Qaran ee Xiriirka Shaqaalaha** wuxuu ilaaliyaa shaqaalaha isku yimaada si ay u horumariyaan goobtooda shaqada, oo ay ku jiraan ilaalinta badqabka iyo caafimaadka shaqada.  
**(866) 667-NLRB (6572)**

**Waxaad xaq u leedahay in laguula dhaqmo sida dadka kale loola dhaqmo.** Waxaa lagaa ilaalinayaa takoorka ku salaysan jinsiyada, midabka, da'da, macluumaadka hidaha, jinsiga, nooca galmoodka, aqoonsiga jinsiga, diinta, asalka dalka aad kasoo jeedo, naafonimada, ama heerka halyeeynimada.



**Guddiga Fursadaha Loo Siman Yahay** wuxuu xoojiyaa sharciyada federaalka ee ka dhigaya sharci daro in lagu takooro codsadhaha ama shaqaalaha arrimo la xariira jinsiyada, midabka, diinta, jinsiga (ay ku jirto uurka, aqoonsiga jinsiga, iyo nooca galmada), dalka qofku kasoo jeedo, da'da (40 ama ka weyn), naafonimada, ama macluumaadka hiddaha.  
**(800) 669-4000**



**Xafiiska DOL ee Barnaamijyada U Hogaansanaanta Qandaraaska Federaalka** ayaa masuul ka ah xaqiijinta in shirkadaha ganacsiga la sameynaaya dowladda Federaalka inay u hoggaansamaan sharciyada iyo xeerarka ka hortaga takoorka.  
**(800) 397-6251**

**Waxaad xaq u leedahay inaad ku biirto asxaabtaada si aad ugu doodaan xaaladaha shaqo ee wanaagsan.** Sharciyada shaqada waxay ilaalinayaan xaq aad u leedahay inaad sameysato ururo iyo inaad asxaabtaada ku biirto si aad u hormariso mushaarka iyo xaaladaha shaqada.



**Guddiga Qaran ee Xiriirka Shaqaalaha** wuxuu ilaaliyaa shaqaalaha isku yimaada si ay u dhistaan urur ama si wadajir ah u hormariyaan goobtooda shaqada, oo ay ku jiraan badqabka iyo caafimaadka shaqada.  
**(866) 667-NLRB (6572)**

**Waxaad xaq u leedahay in laguula dhaqmo si cadaalad ah sida halyeey ama xubin shaqaale ah.** Shirkadaha ma samayn karaan takoor ku salaysan xaalada ciidanka ee hadda ama hore, waana inay mararka qaarkood kordhiyaan doorbidida shaqaaleysiinta.



**Adeegga Tababarka iyo Shaqaalaysiinta Halyeeyga ee DOL** wuxuu ilaaliyaa xuquuqda shaqaalaysiinta halyeeyada, xubnaha adeega kala guurka ah, iyo lamaanaha milatariga.  
**(866) 4-USA-DOL (487-2365)**



**Xafiiska DOL ee Barnaamijyada U Hogaansanaanta Qandaraaska Federaalka** wuxuu xaqiijiyaa in qaybo gaar ah oo kamid ah halyeeyada shaqaalaha ah (ama codsadyaasha) qandaraasleyaasha federaalka ee la daboolay ama qandaraasleyaal hoosaadka in la ilaaliyo xuquuqdooda.  
**(800) 397-6251**

**Waxaad xaq u leedahay in lagaa dhowro aargoosiga marka aad isticmaasho xuquuqahaaga kor lagu xusay.**

Shaqaalaha soo galootiga ah waxay guud ahaan leeyihiin xuquuq la mid ah tan shaqaalaha kale iyadoon loo eegeyn xaaladda socdaalka. Shaqaalaha soo galootiga ah waxay sidoo kale guud ahaan xaq u leeyihiin in laga ilaaliyo aargoosiga ku saleysan xaaladooda socdaalka.

**Halkaan xog badan ka ogoow**



**Worker.gov**